



Handwritten notes:
Fo: Nim
usem
Gooan
23-8-23

Ref/X/G/H/D/DH:- 16 /2023

25/02/2023.

Xafiiska Gudida Hubinta Iyo Daba galka Dhulka

Ku:Maayir ku xigeenka Caasimada
Og:Gudoomiyaha Gudida Hubinta Iyo Daba Galka Dhulka
Og:Xoghayha Fullinta Ee Dawlada Hoose Ee Hargaysa
Og:Maayirka Caasimada

Handwritten notes in red:
Ku: ag dhulka
dib hubinta k
dib iyo soo warka
hadii joo--
sidaa k
yahuu
25/02/23

Ujeedo: Warbixin File

Mudane Mayir,
Halkan Waxaan Kugu soo Gudbinaayaa Warbixinta Aad isoo
Waydiisay Ee Laba Fayl Ee Kala Ah **Tr:4783** Kuna Qoran Tahay
Magaca: Safiya Maxamed Cabdale Kuna Yaala **Dagmadda**
Ahmed Macalin Haaruun Gaar Ahaan **Beerta Faysal Abdilaahi**
Ileeye Cabirkiisuna Yahay **45x48M**.

Faylka Labaad **Tr:27094** Kuna Qoran Yahay **Bashiir Maxamed**
Nuux Kuna Yaala **Dagmadda Ahmed Macalin Haaruun** Gaar
Ahaan **Beerta Faysal Abdilaahi Ileeye** Cabirkiisuna Yahay **90x48M**

Hadaba Faylka Sare Ee Ay Ku Qoran Tahay Safiya Gabi ahaanba
Waxa Martay Wadada **200ft** Ee Dhex marta Beerta Faysal Abdilaahi
Faylkan markii Dhulkiisa Wadadu Martay Waxa Uu Ee La Saxay
Qorshihii Beerta Ee La Dhex Mariyay Wadadii Dhulkan Waxa uu
Dib Uugu soo dhacay Blockgii ka Hooseeyay.
Markaa Dhulkan Waxa Xaq U Leh **Tr:27094** Kuna Qoran
Yahay **Magaca: Bashiir Maxamed Nuux**.

Fiiro Gaara: Halkan Waxaan Talo Ahaan Ku soo Jeedinaayaa In
Bashiir Faylkiisa Loo sii Daayo Maadaama Labada Macmiilba
La Iskugu Yeedhay Oo La Is Hor Fadhiisay Waliba Mid Kastaaba
Warbixintii Markii la Soo Jeediyay Uu Ku Qancay Safiyina Way soo
Xaraysay Mulkiyadii iyo Faylkii ay la Baxdayba

Abdirahman Mohamed Ismail

Handwritten signature of Abdirahman Mohamed Ismail.

Madaxa Daba Galka Ahna Xoghayaha Guud Ee Gudida Hubinta

**Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa**



**Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa**

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/GHDDH/_037/2023.

Date: -02/08/2023

Ku: Duqa Caasimda Jsl
OG: Ku xigeenka duqa caasimada
OG: Xoghayaha Fulinta dawlada hoose

=Hargeysa=
=Hargeysa=
=Hargeysa=

Ujeedo: Warbixin Dhul

Mudane Moyer

Waxan halkan kuugu soo gudbinaynaa warbixin aad I soo waydiisay ee ujeedadeedu ahayd Dib u hubi igana soo warbixi.

Hadaba gudoomiye waxa ii yimid dhinicii file-no4783 kuna qoran tahay Safiya Maxamed Cabadalle ahna Xaaska Aadan Baradho waxayna ii cadaysay in ay ka fasaxday raalina ka tahay in la cancel gareeyo file-kaas.

Sidaas darteed gudoomiye waa sidaas warbixinta dhulkaasi.

Allaah Mahad Leh

**Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Guud Ee Waaxada Dhulka**



Email: MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa



Go'aan Lr: 318 /2023

Date: 28/03/2023

G'o'an Guddi Fulineed:-

Shir ay isugu yimaadeen guddida Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay **28-03-2023**, Shir Gudoomiyena uu ka ahaa Duqa Caasimadda Hargeysa (**C/kariim Axmed Mooge**), kuna saabsanayd **Tir Tirif File (Cancel File)** dood iyo falanqayn dheer ka Dib:-

Guddida fullintu:-

Markay Arkeen:

Sharciga Maamulka Gobalada & Degmooyinka Jsl ee
Xeer No: 23/2019

Markay Arkeen:

Tixraac, Warbixinta sumadeedu tahay **X/G/ H/D/ HH/16/2023**, kuna taariikhaysan **25-03-2023**, ujeedadeeduna ahayd warbixin file, kana soo baxday Madaxa daba Galka ahna Xoghayaha Guud ee Gudida Hubinta DHH.

Markay Ogaadeen:

Sida ku cad warbixinta ka soo baxday Madaxa daba Galka ahna xoghayaha Guud Hdd ee guddida daba Galka. In Fayl ka ay ku qoran tahay Safiye Maxamed Cabdale Tr: **4783** Gabi ahan waddo martay, loona madax banaaneyo faylka uu ku qoran yahay Bashiir Maxamed Nuux Tr: **27094**.

Markay Xaqiiqsadeen:

In ay lagama maarmaan tahay in la cancel gareeyo File No: **4783** maadaama dhulkeedi waddo martay dhulkaso Cabir ahaan dhaan (**45*48 m**) kuna yaala deg. A.M.H. Tallada Masuuliyiinta ay howshani khusayso.

Markay Tixgaliyeen:

Waxa ay go'aansadeen.

Ka dib markay arkeen dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan Guddida Fulintu waxa ay go'aansadeen in file No: **4783** la cancel gareeyo dhulkaas oo ay ku qoran tahay **Safiya Maxamed Cabdale** oo hore fayl ula baxday kadibna, ay soo celiysay maadaamao dhulkeed gabi ahaanba wadadii 200ft, Martay dhul kaasoo ku taal degmada A/m/haarun gar ahaan beerta faysal Abdilaahi ileeye Cabirkiisuna dhan yahay **45*48** dhulkaa waxa loo madax baneeyay faylka labaad ee uu ku qoran yahay Bashiir maxamed Nuux Tr: **27094** kana yaala **Degmadda Ahmed Macalin Haruun**, gaar ahaan beerta faysal Abdilaahi ileeye Cabirkiisuna dhan yahay **90x48m**. maadaama ay labada dhinac lay hor fadhiisiyey oo ay ku qanceen, safiyna soo xaraysay mulkiyadi iyo faylkii ay la baxday.

(Siciid Nuur Jaamac)
(Xoghayaha Fullinta D/Hoose/Alba)
Xoghayaha Golaha Deegaanka Harg



(Khadar Axmed Cumar (Khadar Nuur))
Ku-Xigeenka Duqa Caasimadda/Ahna
Gud-Xig Golaha Deegaanka Hargeysa

